**Liiska Hubinta Arjiga Kaalmada Milkiilaha Guriga**
**Waaxda Horumarinta Xaafadda**
**Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center)**

Waad ku mahadsan tahay in aad danneysay Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center). Hoos waxaa ku qoran warqadaha aad u baahan tahay in aad ku soo dartid arjigaada. Fadlan hubso in aad soo raacisid dhamaan warqadaha loo baahan yahay ee ku qoran liiska.

Maka arjigaada ku dhamaystiran yahay dhamaan warqadaha hoose, fadlan u soo dir:

**The Boston Home Center**
**Attn: Homeowner Assistance Program**
**26 Central Ave**
**Hyde Park, MA 02136**

Kaddib marka aan helno warqadahaan, waxaan ku ogeysiin doonaa, qoraal ahaan, xaaladda uu ku sugan yahay arjigaada.

**WARQADAHA LOOGA BAAHAN YAHAY DHAMAAN ARJIILEYAASHA:**

- ☐ Arjiga Brograamka oo dhamaystiran lana saxiixay. Dhamaan milkiileyaasha waa in lagusoo daro arjiga.
- ☐ Kashifaadda Brograamka la dhamaystiray lana saxiixay
- ☐ Koobiga Heshiiska Diiwaanka (laguna magacaabo "Heshiiska Joojinta Sheegashada" (Quitclaim Deed), "Heshiiska Ballan Qaadka" (Warranty Deed), ama "Shahaadada Lahaashada" (Certificate of Title). Koobiga waxaa laga heli karaa Maxkamadda Edward Brooke Courthouse - Diiwaan Gelinta Heshiisyada Edward Brooke Courthouse - Registry of Deeds, 24 New Chardon Street, Boston, ama tag www.suffolkdeeds.com.
- ☐ Haddii loo baahdo Shahaadada Dhimashada asalka ee dhamaan dadka dhintay kuna qoran heshiiska ku jira diiwaanka (haddii aan laga diiwaan gelinin Diiwaangelinta Heshiisyada Suffolk (Suffolk Registry of Deeds). Shahaadada Dhimashada waxaa laga heli karaa Diiwaanka Dhallashada, Dhimashada iyo Guurka, Dawladda Hoose, Qolka 213, Boston MA, 02201.
- ☐ Koobiga Ceymiska Milkiilaha Guriga (Homeowner's Insurance Policy) iminka jira. Haddii guriga uu ku yaal meelaha biyo galeenka, waxaa loo baahan yahay warqadaha ceymiska.

**Liiska Hubinta Arjiga Kaalmada Milkiilaha Guriga**
**Waaxda Horumarinta Xaafadda**
**Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center)**

- ☐ Koobiga Canshuur Celinta Federalka ugu dambeyay oo saxiixan lana soo raaciyo Foomamka W-2 iyo dhamaan Jadwalada. (Foomka IRS 1040, 1040A, ama 1040EZ) ee loogu talogalay dhamaan milkiileyaasha. Haddii aad Iskaada u Shaqeysatid, la kaalay Bayaanka Fa'iidada iyo Khasaarada (Profit and Loss Statement) aad adiga iyo xisaabiyahaada saxiixdeen, iyo koobiyada Canshuur Celinta labadii sanno la soo dhaafay.
- ☐ Labo dabada jeegagga iminka jira ee loogu talogalay dhamaan xubnaha reeraha ee jira 18 sanno ama ka weyn; iyo/ama caddeynta dakhliga laga keeno dhamaan ilaha kale sida Warqadda Siinta Soshal Sekuritiga, Magta Shaqo La'aanta, Hawlgabnimada, iwm.*
- ☐ Bayaanka Deynta Guriga iminka jirta ee dhamaan deynta lagu leeyahay hantida kana mid ah qiimaha ku darsomay (equity) ama deynta dayactirka. Soo raaci warqadda sharaxda isticmaalka deynta qiimaha ku darsomay (equity loan).
- ☐ Koobiga keydka ugu dambeyay, bayaanada baaqiga xisaabaadka wareega iyo xisaabaadka kale lagana soo qaado dhamaan hay'adaha lagu shubo (sida 401K, maalgelinta "stock", bond, bangiyada "credit union", iwm.) ee dhamaan milkiileyaasha.
- ☐ Koobiga Ruqsadda Kale
- ☐ Koobiga Sawirada La Shabbadeyay (Waaxda Adeegyada Fattashaadda ama Shabadda ISD)

**Xagga dhamaan dadka ka weyn 18 sanno. Haddii qofka yahay / dadka aysan shaqeynin, waa in la keeno koobiga qoraalka dugsiga ama sharaxaadda daruufaha iyo warqadda Affidafitka Dakhli La'aanta.*

*Waxaa dhici karto in macluumaad dheeraad ah laga dalbado arjiilaha. Dhamaan macluumaadka la soo codsaday waa in loo gudbiyo Magaalada Boston.*

**Xasuusin:** Qor macluumaadka dheeraadka ah ay adiga kula tahay in aan ogaano si aan uga shaqeyno arjigaada.

________________________________________

________________________________________

# ARJIGA BROGRAAMKA HAGAAJINTA GURIGA

## *Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center)*

### Waaxda Horumarinta Xaafadda (Department of Neighborhood Development)

**Fadlan calaamee sanduuqa ku xiga brograamka gaarka aad adiga dalbaneysid:**

- ☐ HomeWorks HELP
- ☐ Hagaajinta Guriga Waayeelka
- ☐ Ammaanka Macdanta "Lead' ee Boston (Lead Safe Boston)
- ☐ Brograamka ADU

## I. Macluumaadka Arjiilaha

**Arjiilaha:** ______________________ ____________ ______________________
Magaca Kowaad | Magaca Dhexe | Magaca Dambe

**Nambarka Soshal Sekuritiga:** ____________ - ____________ - ____________

**Cinwaanka:** ______________________ ______________ ________ ________
Jidka | Magaalada | Gobolka | Zip Code

**Telefoonka:** ______________ ______________ ______________
Guriga | Tel. Gacanta | Shaqada

**Taariikhda Dhallashada:** ____________ **Iimayl:** ______________________

**Muwaadin Mareykan?**

☐ Haa ☐ Maya

**Shisheeye Daggan?**

☐ Haa ☐ Maya

**Arjiilaha Labaad:** ______________________ ____________ ______________________
Magaca Kowaad | Magaca Dhexe | Magaca Dambe

**Nambarka Soshal Sekuritiga:** ____________ - ____________ - ____________

**Cinwaanka:** ______________________ ______________ ________ ________
Jidka | Magaalada | Gobolka | Zip Code

**Telefoonka:** ______________ ______________ ______________
Guriga | Tel. Gacanta | Shaqada

**Taariikhda Dhallashada:** ____________ **Iimayl:** ______________________________

**Muwaadin Mareykan?**

☐ Haa ☐ Maya

**Shisheeye Daggan?**

☐ Haa ☐ Maya

## II. Macluumaadka Dakhliga Reerka

Qor dhamaan lliiska dadka daggan hantida. Waa in la qoro dakhliga dhamaan xubnaha reerka ee ka weyn 18 sanno.

| Magaca Xubinta Reerka | Taariikhda Dhallashada | Xariirka uu la Leeyahay Arjiilaha | Iskudarka Dakhliga Sannadka** |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

**Iskudarka tirada dadka ku sugan reerka:** ____________

***Ilaha laga helo daqliga waxaa ka mid ah mushaarka, waqtiga dheeraadka, gunnada, khidmadda, soshal sekuriti/manaafacaadka hawlgabnimada, manaafacaadka shaqo la'aanta, dakhliga korsaarka/wadaagga, ceydha, taakuleynta xaaska/masaruufka cunugga iyo dhamaan dakhliga kale.*

**Arjiilaha miyuu kaalmada maaliyadda ka helay Waaxda Horumarinta Xaafadda Magaalada Boston (City of Boston Department of Neighborhood Development)?**

☐ Haa ☐ Maya

Haddii ay tahay haa, maxay tahay taariikhda aad qaadatay kaalmada maaliyadda? ____________

Maxay ahayd ujeedada kaalmada maaliyadda?

______________________________________________

Maxuu yahay cinwaanka hantida meesha aad ku qaadatay kaalmada maaliyadda?

______________________________________________

## III. Macluumaadka Hantida

Qiimaha dhamaan hantida maguuraanka (guriga aan aasaasiga ahayn):

$____________________

Iskudarka hantida xisaabaadka wareega iyo keydka:

$____________________

Miyaad hanti ku iibisay qiimo ka yar qiimaha suuqa labadii (2) sanno

☐ Haa ☐ Maya

## IV. Macluumaadka Hantida

**Fadlan calaamee nooca hantida:**

☐ Hal qoys
☐ Labo qoys
☐ Saddax Qoys
☐ Afar Qoys
☐ Kondominium

**Fadlan sharax hagaajinta gudaha iyo dibadda ee loo baahan yahay:**

______________________________________________

**Maclumaadka Kirada Qeybta (buuxi oo keliya haddii lTagu dabaqi karo):**

| Namabrka Kirada Qeybta | BanaanTirada (Haa/Maya) | Dagganaha Qolalka Jiifka | Bil Kasta Magaca | Kirada |
|---|---|---|---|---|
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |

**Hantida ma u baahan tahay shaqada ka-fiiqidda macdanta "lead"?**

- ☐ Haa
- ☐ Maya

**Haddii ay tahay "Haa", cunug ka yar 6 sanno miyaa kula daggan ama kula daggi doono hantida?**

- ☐ Haa
- ☐ Maya

**Haddii ay tahay "Maya" cunug ka yar 6 sanno miyaa si joogto ah u soo booqda hantida?**

- ☐ Haa
- ☐ Maya

**Haddii ay tahay "Haa", intee saac halkii todobaad ayuu cunugga ku qaataa/ku qaadan doonaa hantida?** ____________________

## V. Macluumaadka Xariirka Suuq Geynta

*Fadlana buuxi qeybta soo socoto si aad noogu kaalmeysid in aan fullino sharuudahena xariirka suuq geynta. Jawaabtaada waa iskaa mana saamayn doonto arjigaada.*

**Isirka/Dhallashada qofka ku sugan reerkaada (calaamee dhamaan inta lagu dabaqi karo):**

- ☐ Hindida Mareykanka/Dhalladka Alaska
- ☐ Asian
- ☐ Madow ama Mareykanka Afrikaanka
- ☐ Dhalladka Hawaiian ama Jasiiradda Basifigga
- ☐ Caddaan
- ☐ Hisbanik ama Latino
- ☐ Wax Kale: ____________________

**Arjiilaha ma yahay qof itaal darran?**

- ☐ Haa
- ☐ Maya

**Arjiilaha ma ka weyn yahay 62 sanno?**

- ☐ Haa
- ☐ Maya

**Arjiilaha ma tahay haween madax ka ah reerka?**

- ☐ Haa
- ☐ Maya

## VI. Saxiix kuna qor Taariikhda

Aniga waxaan caddeynaa sida hoos timaado been abuurka in macluumaadka la soo dhaafay yahiin run, sax, dhamaystiran aan qalad lahayn dhinac kasta. Aniga waxaan halkaan u fasaxay Magaalada Boston in ay si madax banaan u xaqiijiso macluumaadka la bixiyay halkaan. Aniga waxaan caddeynaa in aan akhristay Kashifaadda Brograamka iyo waxaan waafaqsanaha Qodobada iyo Sharuudaha brograamkaan.  Aniga, waxaan fahamsanahay sida hoos timaado Sharciga Sheegashada Beenta (False Claims Act), 31U.S.C§§ 3279-3733, kuwa iyagoo ogsoon soo gudbiya, ama sabab u noqda in qof kale ama hay'ad, soo gudbiso sheegashooyin been ah oo lagu qaato maaliyadda dawladda, waxaa loo qabsan karaa saddax laab khasaarada soo gaartay dawladda lagu darray ciqaabta madaniga halkii sheegasho oo been abuur lagu qaato.

| | | |
|---|---|---|
| *Arjiilaha (daabac magaca)* | *Saxiixa Arjiilaha* | *Taariikhda* |
| *Arjiilaha Labaad (daabac magaca)* | *Saxiixa Arjiilaha Labaad* | *Taariikhda* |

☐ Marka aan calaameeyo sanduuqaan, Aniga waxaan aqoonsanahay in marka aan qoro magaceyga in taasi rasmi ahaan la mid tahay saxiixa warqadaan.

# Kashifaadda Brograamka

## Brograamka Hooyga Qeybta Dheeraadka
## (Additional Dwelling Unit Program (ADU)

## Waaxda Horumarinta Xaafadda
## Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center)

Brograamka Hooyga Qeybta Dheeraadka ee Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center's Additional Dwelling Unit Program) (ADU) wuxuu milkiileyaasha guryaha Magaalada Boston ku kaalmeeyaa in ay ka gudbaan khasaarada qiimaha ku soo siyaada suuqa guriyeynta iminka jira, iyo in uu siiyo qorshe kale oo la awoodo si loo maalgeliyo hagaajinta looga baahan yahay guryahooda iyo si loo hormariyo dib u maalgelin laga arki karo xaafadaha Boston. Brograamka wuxuu hoos yimaad hadba sida loo helo maalgelin.

**SHARUUDAHA XAQ U YEELADSHADA**
**Si aad xaq ugu yeelatid ADU, waa in aad la kullantid DHAMAAN qodobada soo socdo:**

- In aad ahaatid milkiile daggan hanti ka kooban 1-4 qoys oo ku taal Magaalada Boston;

- Dakhliga Ugu Badan Reerka Kama Badnaan Karo 135% Dakhliga Dhexe Xaafadda (Area Median Income) (AMI) sida ay u xisaabtay Waaxda Guriyeynta iyo Horumarinta Magaalada Mareykanka (U.S. Department of Housing and Urban Development) (HUD) taasoo ku saleysan tirada reerka. (Fiiri jaantuska hoose);

- Milkiileyaasha dakhligooda ugu badan ka sareeyo 120% AMI sida Hud u xisaabtay waxay xaq u leeyahiin deynta Magaalada oo gaarta ilaa 50% kharashka (ilaa deynta ugu badan) xagga hagaajinta loo ogol yahay lana timaado maaliyadda 50% ama doolar-ilaa-doolar (1:1) maaliyadooda ama deynta bangiga. Waxaad xuduudda dakhliga iminka jira ka heli kartaa halkaan.

- In aad haysatid in ka yar $75,000 oo ah hantida maaliyadda. Dhamaan hantida, haddii ay tahay lacagta caddaanka, qiimaha ku soo siyaada hantida maguuraanka aasaasiga, maaliyadda maalgelinta, ama shay kale oo qiimo leh, waxaa lagu darri doonaa xisaabinta hantida. Waxyaabaha keliya ee ka reeban waa maaliyadda aasaasiga, maaliyadda hawlgabnimada dawladda ogolaatay, iyo qorshooyinka keydka kulliyadda. Haddii hantida ay lagama maarmaan u tahay ilaha dakhliga aasaasiga ee milkiilaha, sida milkiyadda ganacsiga, waxaa dhici karto in qaar ama dhamaan hantida laga dhaafo xisaabinta, balse ilaa heerka loo baahan yahay si dakhliga milkiilaha u sii socdo;

- Waa in la bixiyo dhamaan xisaabaadka Magaalada Boston iyo deynta guriga, sida canshuurta hantida iyo biilasha biyaha;

- Waa in la bixiyo dhamaan deynta iyo ceymiska milkiilaha guriga;

- Waxaa dhici karto in aadan kaalmada maaliyadda hagaajinta guriga ka qaadanin brograamka Magaalada Boston tobankii (10) sanno ee la soo dhaafay, marka laga reebo maaliyadda ku baxda fiiqidda macdanta "lead".

## QODOBADA IYO SHARUUDAHA

- Dakhiga reerka uu soo gudbiyay Milkiilaha guriga waxaa soo gala dhamaan dadka daggan guriga uu daggan yahay milkiilaha guriga iyo waxaa ka mid ah ilaha dakhliga dhamaan dadka daggan (dakhliga la canshuur iyo dakhliga aan la canshuurin), sida, balse kuma eka: lacagta la shaqeysto, saacadaha dheeraadka, qeybsiga IRA, gunnada qeyb ka mid ah shaqada, maalgelinta la qeybsado, korsaarka, maalgelinta sannadka (annuities), xaqa, magta Maamulka Ciidadamada (Veteran Administration VA), dakhliga guud kirad muddada dheer, dakhliga guud kirada muddada gaaban, khidmadda, dakhliga gadaal loo dhigay, kharashka ceydha, manaafacaadka soshal sekuritiga, kharashka itaal darrida, taakuleynta xaaska, kaalmada dadweynaha, mushaarka fasaxa bukaanka, magta shaqo la'aanta, iyo dakhliga laga helo ammaanada, hawlaha ganacsiga, iyo maalgelinta.

- Ma jirto lacag bil kasta lagu bixiyo deynta mana leyska rabo in dib loo bixiyo ilaa milkiilaha ka guuro, iibiyo, ama wareejiyo milkiyadda hantidooda, ama ku dhaqaaqo dib u maalgelinta lacagta caddaanka guriga. Deynta Magaalada waxaa suga Deynta Guriga (Mortgage) iyo Warqadda (Promissory Note). Deynta Guriga (Mortage) waxay ahaan doontaa qaan saaran hantida oo la geliyo diiwaanka barwaaqo sooranka Commonwealth of Massachusetts Suffolk Registry of Deeds (Diiwaangelinta Heshiisyada).

- Mas'uuliyadda qareenka ka saaran bixiyaha deynta guriga waxay tahay in uu badbaadiyo maslaxadda bixiyaha deynta.

- Qaataha deynta wuxuu qabsan karaa qareen oo mattala maslaxadiisa ganacsiga, hase ahatee waa in uu iska bixiyo kharashka.

- Ka hor inta aan la helin kaalmada maaliyadda, Milkiilaha Guriga waxaa laga rabaa in uu saxiixo Qodobada iyo Sharuudaha brograamka, warqadda Promissory Note, Deynta Guriga, iyo warqadaha la xariira deynta.

- Milkiilaha guriga wuxuu u ogolaan doonaa wakiilka Qeybta Xarunta Guriga Boston DND (DND Boston Home Center Division) in uu fattasho iyo baaro dibadda iyo gudaha dhismaha, kana mid ah guryaha lagu nool yahay.

- Sida uu tilmaamay Ku Takhasusaha Dhismaha DND, dhamaan hagaajinta degdegga iyo hagaajinta ammaanka waa in la fulliyo ka hor inta aan la maalgelinin hagaajinta noocyada kale.

- Hagaajinta guriga waa in ay u hoggaansan tahay dhamaan tilmaamaha lagu dabaqi karo iyo sharciyada la xariira guryaha iyo dagmooyinka ku qoran Diiwaanka Qaranka Meelaha Taariikhda (National Register of Historic Place), ama Guddiga Taariikhda Gobolka (State Historical Commission), ama Guddiga Astaamaha Magaalada Boston ku magacawday Astaanta Dagmada (Landmark District).

- Milkiilaha guriga wuxuu caddeynaa in iyaga, ama xubin kale oo ka tirsan qoyska sokke, uu iminka ama horay uusan u ahayn toban iyo labadii bil (12) la soo dhaafay, shaqaale, wakiil, la-talliye, sarkaal ama sarkaal la doortay lana magacaabay ee Waaxda Horumarinta Xaafadda Magaalada Boston (City of Boston Department of Neighborhood Development). Marka laga hado kashifaaddaan "xubinta qoyska sokke" waxaa ka mid ah waalidiinta, xaaska, walaalaha, ama caruurta, iyadoo aan la fiirinin meesha ay daggan yahiin.

- Milkiilaha waa in aan lagu xakumin in uu kadeed u geystay daggane, ama aan lagu helin in uu jebiyay Sharciyada Caddaaladda Guriyeynta (Fair Housing Laws).

- Milkiilaha guriga ma ahaan karo eedeysane ku lug leh ashtako dambi ka socdo Maxkamadda Guriyeynta, ama dhexdhexaadin lala galo Guddiga Caddaaladda Guriyeynta Boston (Boston Fair Housing Commission) ama Guddiga Ka Soo Horjeedo Takoorka Massachusetts (Massachusetts Commission of Discrimination).

- Milkiilaha guriga waa in uusan iminka qeyb ka ahayn dacwad kiis iminka socdo oo ku saabsan burbur dhaqaale (bankruptcy case). Haddii milkiilaha guriga uu horay qeyb ka ahaa dacwad la xariirta burburka dhaqaalaha, Maxkamadda Burburka (Bankruptcy Court) waa in ay dacwadaas soo afjarto ama dibadda u tuurto kaddibna muddada racfaan kasta oo lagu dabaqi karo waa in ay dhamaato.

- Milkiilaha guriga wuxuu waafaqsan yahay in uu la hadlo saxaafadda, haddii la weydiiyo in uu ka qeybgalo munaasabadda saxaafadda iyo/ama xayaysiin kale oo la xariirto xayaysiinta iyo/ama soo sheegidda manaafacaadka brograamka dayactirka.

- Milkiilaha guriga wuxuu waafagsan yahay in uu dhigo calaamad muujisa in Waaxda Horumarinta Xaafadda (Department of Neighborhood Development) dayactirto hantida iyo in calaamadda noocaas jiri doonto ilaa inta uu socdo dhismaha iyo muddo soddaon (30) maalin kaddib.

- Hantida looma baddali karo kondominium muddo toban (10) sanno kaddib marka dhismaha la dhamaystiro.

- Milkiilaha guriga wuxuu waafaqsan yahay in dagganeyaasha jira aan la saari doonin maxaa yeelay waxaa socda dayactirka Brograamka.

**XISAABIN**

Aniga waxaan fahamsanahay in bacdamaa aan ahay Qaataha brograamka, waqti ka waqti, DND waxay si aan kala sooc lahayn hababka xisaabinta ku fullin kartaa qeyb ka tirsan kiisaska si loogu hoggaansamo tilmaamaha Deeqda Blogga Horumarinta Bulshada Federaalka, waxaan waafaqsanahay in aan si buuxdo ula shaqeeyo xisaabinta/wareysiga hantida haddii loo baahdo.

**AFEEF**

ADU waa brograam deyn oo u suurtogeliya milkiileyaasha guriga in ay sameyaan qeyb dheeraad ah oo lagu noolaado oo ku yaal gudaha gurigooda. Magaalada qeyb kama aha heshiiska ka dhexeeyo milkiilaha guriga iyo qandaraaslaha. HomeWorks HELP ma siiso xuquuq qandaraasleyaasha, dad saddaxaad ama hay'ado aan qeyb ka ahayn heshiiskaan deynta.

Milkiilaha Guriga wuxuu caddeynaa in isaga/iyada fahamsan tahay dhamaan qodobada iyo sharuudaha kore iyo in dhamaan macluumaadka uu soo gudbiyay Milkiilaha Guriga loo soo saaray si loo helo deynta kaalmada guriyeynta iyo kaalmada farsamada laga helo Magaalada Boston iyo in macluumaadkaas la soo sheegay yahiin run iyo kuwo dhamaystiran ilaa inta ugu badan uu ogsoon yahay ama aaminsan yahay Milkiilaha Guriga. Marka si ula kac iyo si qaldan loo sheego xaqiiqada la xariirto brograamkaan, taasi waxay dhallin kartaa diidmada manaafacaadka ama in Magaalada loo celiyo manaafacaadka laga qaatay Brograamka. Sida qaldan u sheegidda noocaas waa jebin loo geystay sharciga Federaalka iyo Gobolka.

La saxiixay sida hoos timaado ciqaabta been abuurka.

| | |
|---|---|
| **Milkiilaha/Arjiilaha (Saxiix) (Saxiix)** | **Milkiilaha Guriga/Arjiilaha-Labaad** |
| **Milkiilaha Guriga/Arjiilaha (Daabac)** | **Milkiilaha Guriga/Arjiilaha Labaad (Daabac)** |
| **Taariikhda** | **Taariikhda** |

**Sida loo dalbado kaalmada maalgelinta ADU**

***Talaabada 1aad - Qorsheyso qeybtaada***

Ka hor inta aadan dalbanin ruqsadda qeyb dheeraad ah oo la daggo, waxaad u baahan in aad samaysid naqshada qeybta aad dooneysid in aad dhistid. Tag qeybta handasada kore si aad u heshid waano.

- Diyaari naqshada hore ama sawirada qeybta aad dooneysid
- Diyaari sharaxaad ku saabsan qeybta dheeraadka ee la dago
- Qaad sawiro ku saabsan booska iminka jira
- Hel xisaabinta kharashka.

***Talaabada 2aad - Tag Kullanka Tababarka ADU (Leyska Dhaafi Karo)***

- Kullamada tababarka handasada ADU waxaa iminka lagu qabtaa internetka Qamiista kowaad ee bil kasta, laga bilaabo 4 - 7 p.m. Si aad u heshid xariirinta shirka internetka, fadlan riix battanka hoose "Isku Qor in aad Timaadid" (“Sign Up To Attend” button) kaddibna hubso in aad gashid emailkaada.
- Bilowga kullanka tababarka waxaa ka mid ah waqti kooban oo loogu talogalay su'aalaha guud. Tani waxaa ku xiga fiirinta naqshadaha arjiilaha soo jeediyay xagga ADU oo loo qorsheyay 15-daqiiqo mikiiba. Tani waxay tirada arjiileyaasha ku soo koobi doontaa ku dhawaad 10 halkii kullan. Kaddib marka aad saxiixdid, waxaa laguu sheegi doonaa haddii aad ku jirtid 10ka hore ama haddii kale. Haddii kale, weli waad tagi kartaa si aad u dhageysatid wada hadalka (bacdamaa mashaariic badan ay la kulmaan taxadiyada la midka ah) kaddibna buuxi haddii qof kale uusan imaanin, ama waxaad codsan kartaa in aad tagtid kullan la qaban doono mustaqbalka.
- Naqshadaha waxaa la fiirin doonaa oo keliya haddii loo soo gudbiyay internetka marka la isticmaalo battanka hoose "Isku Qor Si Aad u Timaadid". Dadka taga kullanka tababarka waxaay lagu dhiirigelinaa in ay fiiriyaan kullankaan macluumaadka ADU ee loogu talogalay 50-minute midkiiba kullanka ka hor.

***Talaabada 3aad – Dhamaystir Ruqsadda Adeegyada Fattashaadda***

- Ka hor inta aadan bilaabin dhismaha, waxaad u baahan tahay ruqsadda foomka-dheer oo laga soo qaato Waaxda Adeegyada Fattashaadda (Inspectional Services Department).

***Talaabada 4aad - Diiwaan geli Qeybtaada***

- Qeybta dheeraadka ee la daggan yahay loona isticmaalo sida kirada waa in la diiwaan geliyo sida waafaqsan Ch. 9-1.3 Sharciga Diiwaanka Kirada ee Magaalada Boston (City of Boston Rental Registry Ordinance) waqtiga baddalaadda.

***Yaan la hadli karaa haddii aan qabo su'aalo?***

Su'aalaha guud ee ku saabsan handasada ADU, isku qor in aad tagtid kullamada handasada ADU (fiiri qeybta Sida Loo Dalbado si aad isugu qortid.)

Su'aalaha ku saabsan sida loo helo ruqsadda ADU, la xariir Waaxda Adeegyada Fattashaadda.

Su'aalaha ku saabsan sida oo helo deynta ADU, la xariir Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center).